



Somali

Mudane Waalid/Masuul

Waan ku faraxsanahay in aan kuu sheegno qorshaha Dawlada Fiktooriya ay ku doonayso inay wanaajiso waxbarashada ardada iyadoo u samaynaysa manhajyo cusub isla markaana ku wanaajinaysa warbixinta ardada ee waalidiinta.

### **Manhajka Bareebka ilaa sanada 10aad**

Maarso 2005ta Manhajka Barashada Muhiimka ah ee Fiktooriya ayaa daboolka laga qaaday. Manhajkaasi wuxuu sharxaa qaybaha muhiimka ah ee waxbarashada bareebka ilaa sanadka 10aad. Waxay aqoonsadaan barashada muhiimka u ah ardada inay ku guulaystaan dugsiga, shaqada, noloshooda qof ahaaneed iyo bulshada dhexdeeda. Manhajka waxaa sameeyey Hay'ada Manhajyada Fiktooriya iyadoo ka jawaabaya codsiga Dawlada Fiktooriya iyo Qorshaha Dawlada ee Dugsiyada.

Manhajyadaani waxay helleen kaalmada waaxyaha waxbarashada waxaana lagu dabaqi doonaa dhamaan waxbarashada dawlaga ah iyo kuwa aan dawlaga ahayn ee Fiktooriya, laga bilaabo 2006. Fadlan arag qoraalka ku lifaaqan oo ku siinaya hor-udhaca Manhajka Barashada Muhiimka ah ee Fiktooriya.

### **Qiimaynta sanadka 9aad**

Dhowaan Dawlada Fiktooriya ayaa ku dhawaaqday in barnaamijka qiimaynta La socodka Hor-u-socodka Wixii-la-gaaray [Achievement Improvement Monitor (AIM)] in lagu daray sanada 2006 ilaa sanadka 9aad. Dhamaan dugsiyada waxaa lagu casumayaa inay ka qaybgalaan. Ardada sanadka 9aad waxaa qiimayntooda la samayn doonaa Abriil natiijadana waxaa la helli doonaa dhamaadka teeramka 2aad.

Natiijadu waxay ku salaysnaan doontaa habka cusub ee Manhajka Barashada Muhiimka ah ee Fiktooriya waxayna dabooli doontaa waxyaalla badan oo ardaygu gaaray oo ku haboon ardada sanadka 9aad. Imtixaanku wuxuu ku dari doonaa macluumaadka sanadka 3aad, 5aad iyo 7aad ee imtixaanada qiimaynta waxayna ka caawimaysaa waalidka iyo dugsiyada inay la socdaan waxna ka qabtaan horumarka ardada ee qaybahaas.

### **Warbixinta waalidiinta**

Dhowaan waxaad helli doontaa talo ku saabsan isbedelka la soo jeediyey si looga warbixiyo dugsiyada dawlada. Dugsiyada dawlada, kaararka warbixinta ardaygu waxay kuu suurtagelin doonaan inaad ogaato sida ilmahaagu dugsiga ku yahay wuxuuna kuu sharxi doonaa waxa dugsigu qabanayo si uu u caawimo horumarka mustaqbilkiisa iyo sida laga yaabo inaad guriga ugu caawimi karto.


### **Macluumaadka waalidka**

Hay'ada Qiimaynta Manhajka Fiktooriya waxay aqoonsan tahay inay muhiim tahay in la bixiyo macluumaad waadax ah oo wax ku oolla wixii ku saabsan Manhajka Barashada Muhiimka ah ee Fiktooriya. Marka lagu daro qoraalka sharaxaada-hore ee ku lifaaqan, buugga yar oo macluumaad ayaa loo samayn doonaa waalidkana waxaa loo qaybin doonaa horaanta 2006. Daabacadaasi waxay muujin doontaa habab wanaagsan oo manhajka suurtagalka ah ee aad u qiima badan ee Manhajka Barashada Muhiimka ah ee Fiktooriya, waxayna isticmaali doonaan waaya-aragnimada daraasa xaalladeed oo dugsiya kala duwan kuwaas oo muujinaya siday arday kala duwani wax u bartaan.

Waxaanu ku kalsoonahay in da'daaladani ka caawin doonaan ardada Fiktooriya wax ka barata inay yeeshaan aqoonta, xirfada iyo dabeecada ay u baahan yihiin inay ku guulaystaan waxbarasho sarre, shaqo iyo nolol.



**Lynne Kosky, MP**  
Wasiirka Waxbarashada iyo Tababarada



**Stuart Hamilton**  
Madaxa  
VCAA